

# Isticmaalka Interneetka

Macaamisha sharafta leh,

Laga bilaabo 09.02.2009, waxaa isbaddalaya habka isticmaalka interneetka. Taariikhdaan laga bilaabo, waxaad u baahan tahay [Aqoonsi-maktabad](#), si aad u isticmaashid kombuterada interneetka leh. Qiimaha Aqoonsigu waa CHF 8.-, waxaadna ka helikartaa adeegga macaamiisha ee ku yaal dabaqa hosse.

Isticmaalka u horreeya kahor, waxaa lagama maarmaan ah, in layska diiwaan geliyo goobta War-isa-siinta ee ku taal dabaqa labaad (OG2). Keddib, lam-barka aqoonsi-maktabadeedkaaga iyo erey sir kuu ah, oo kuu gaar ah (sanaadka dhalashada, 4 lambar ah), ayaad interneetka ku geli kartaa.

Maalin walba [30 daqiiqo ayaad interneetka](#) ku jiri kartaa, waxaadna awoodi kartaa inaad dhawr jeer maalintii u kala qaybsatid.

Hadday dhacdo, in mar boosaska interneetka ay wada buuxaan, waxaa lagaa codsanayaa inaad lambar qaadatid oo aad joogtid halka loogu talagalay sugitaanka, tan iyo inta meeli bannaanaaneyso. Hadday sugayaasho dhawr yihiin, hadba kooda ugu lambar yar, baa gelaya booska ugu horreeya ee faaruqa noqda.

Haddii aad rabtid, inaad hal mar keliya interneetka isticmaashid, fadlan la xiriir oo u sheeg adeegaha jooga goobta warisa-siinta.

## Faa'idooyinkaaga:

### [- Waqti kala qaybsi sahlan](#)

Waxaad awoodi kartaa inaad muddada aad interneetka ku jirtid, sidaad rabtid u kala qaybsatid, oo aad dhawr jeer maalintii interneetka gashid.

### [- Interneetgelid aan shiddo lahayn](#)

Isqoriddaada ugu horreysa keddib, kuma khasbanid inaad isticmaal walba aqoonsigaaga tustid.

### [- Gargaar dheeri ah](#)

Shaqaalaha oo waqti dheer idiin haya, waxay idinla garab taagan yihiin ka jawaabidda su'aalaha farsamo iyo nuxur ee interneetka ku saabsan.